WARBIXIN KU SAABSAN BARNEHAGENE(XANAANADA CARUURTA)EE KOMMUNEHA HOBØL.

Warqadahan waxa loogu talo galay in uu noqoto warbixin guud oo ku saabsan barnehagene, waxa markaa dhici kara in farqi u dhaxeeya barnehage ilaa barnehage uu yimaado.

Hobøl waxa jira barnehage gaar loo leeyahay (3 stk) iyo qaar kommunahu leeyahay (3 stk).

Wakhtiga furniinka: Badankoodu waxa ay furan yihiin inta u dhaxaysa 06.45 – 17.00.
Qaar ka mid ah barnehagooyinka gaar ka loo leeyahay waxa ay xidhnaan karaan jul, påske iyo qaybi ka mid ah sommeren(xagaaga). Barnehagen waxa ay leedahay 5 maalmood oo qorshaynta loogu talo galay, sannadkii oo ay xidhantahay. Maalmahaasu jadwalka sannadka ayey ku yaalaan.

Fasax: Caruur oo dhami waa in ay yeeshaan fasax 4 wiig ah wakhtiga xagaaga. 3 wiig oo wadasocda iyo qadimaad ah ama dib dhigid ah, ama 2 wiig + 2 wiig.

Sannad dhigashada barnehageha waxa uu ka bilaabmaa 01. ogosto – 31. luulyo. Caruurta ka baxaysa/dugsiga u wareegaysa 31. waa in fasaxooda hore u sii qaataan.
Barnehagenka waxa loo kala qaybiyey qaybo:

1. qaybta yaryarka oo ay dhigtaan 9 – 14 caruur ah (1 – 3 år)
2. qaybta waaweynka oo ay dhigtaan18 – 24 caruur ah (3 – 6 år)

Sir-haynta: dhammaan shaqaalaha barnehagenka waxa wada saaran sirhayn. Taa macnaheedu waxa weeyaan in aanaan bixinayn warbixin ku saabsan caruur iyo waalid cid kale.
Waajibka ogaysiinta: laakiin waxa na saaran waajib ogaysiineed oo aanu ogaysiinayno barnevernet(maadinta caruurta) iyo sosialtjenesten(adeega bulshada) haddii aanu ka werwer sannahay in ilmaha loo gaystay xanaano la´aan.

Billabidda barnehagenka

Marka uu ilmuhu barnehagenka bilaabaayo, waalidka waxa loo soo dirayaa warqadd ay ku caddahay taariikhda bilaabidda, qaybta uu ilmuhu dhiganaayo iyo warbixin guud uu ku saabsan barnehagenka. Foomka caddaynta caafimaadka, kharashka gaadiidka, sawirka iyo film qaadista way ku jiraan. Tan waa in uu waalidku buuxiyo, saxeexo una soo celiyo barnehagen xiliga bilaabidda barnehagenka.
Caruur gaynta barnehagenku waa saddex cisho iyada oo sababtu tahay in shaqaaluhu ay xaq u leeyihiin in ay shaqada ka fasax qaataan oo ay caruurtooda la joogaan. Maalinta ugu horeysa ilmuhu 2-3 sacadood ayuu joogayaa barnehagen. Waalidku wuu la soconayaa, lana joogayaa ilmaha. Waalidka kale iyo caruurta kale ayey isbaranayaan. Waa muhiim in shaqaalaahu warbixin ku saabsan ilamaha ay helaan si ay isu bartaan. Labada maalmood ee dambe ee soo kaxaynta ilmahawaalidku waxa uu isku deyi karaa in uu ilmaha uu daayo in uu dhex joogo shaqaalaha iyo caruurta kale. Caruurta qaar wakhti bay u baahan yihiin ay waalidka kaga samraan, qaar kalena si fudu bay uga samraan. Sidaa awgeed waa in waalidka la heli karo, telefoon lagu heli karo oo ay yimaadaan marka loo baahdo.

Dhacdooyinka gaarka ah: Xafladaha iyo dhacdooyinka gaarka ah, barnehage kasta iskeed ayey u samaysan kartaa xafladayn yar.
Maalmaha dhalashada: Barnehage kasta wado gaar ah ayey arrintan u leedahay si kala duwan ayey barnehagooyinku u sameeyaan. Arrinkan barnehageha ayaa warbixin ka bixin doona.

Bixinta joogitaanka:
In isku mid ah ayaa la bixiyaa, laakiin waxa kala badin kara lacagta cunatada oo dulfuulaysa. Waxa la bixiyaa 11 bilood sannadkii – luulyo waxba lama bixiyo. Waayo ilmuhu waa in uu 4 wiig oo fasaxa qaato sannadkii.

Sharciyada:
Barnehage kasta sharci gaar ah bay leedahay, oo aah mid barnehageha haga, halkan waxa ka helaysaan warbixin ku saabsan barnehageda aad idin qaabilsan. Qof kasta waxa la siinayaa qorshe-sannadeed ka hadlaaya barnehageda iyo wax qabadkeeda. Badani waxa la qaybiyaa xiliga bilaabidda.

Shaqaalaha:
Barnehagen waxa maamula, maamule ka soo baxay waxbarashada førsteskole-lærer, ama waxbarasho kale oo qaab gudbinta ku saabsan. Qayb kasta waxa jooga macalin iyo 2 til 3 caawiye. Waxa kale oo ay qaybtu shaqaalaysin kartaa qof dheeraad ah oo loo qabanaayo cidda baahi gaar ahi hayso.

Waxyaabaha waalidka laga sugaayo:
- Caruurta waxa la keenayaa oo laga kaxaynayaa(barnehagen) mudada ay barnehagen furan tahay.
- Waalidku **waa** in uu ilaa qaybta gudaheeda soo wado si ay u ogaadaan shaqaaluhu xiliga uu ilmuhu yimid.
- Waalidku waxa ay barnehagenka soo siinayaan fariin haddii uu ilmaha xanuun/maqnaanshiiyo ku yimaado.
- Warbixin oo dhan waa la akhriyayaa, haddii loo baahdona la caawimo dalbayaa si warbixinta loo fahmo.
- Jawaabaha waa in la soo xereeyo mudada kama dambaysta ah ka hor.
- Soo sheeg haddii cid aan waalidka ahayni caruurta soo doonayso.
- Waxa fiican waalidku in ay yimaadaan marka kulanka caruurtu jiro. (Kaffe cabidda waalidka)
- Waxa fiican waalidku in ay yimaadaan marka shirka maa lidka(maca turjumaan haddii loo baahdo) iyo marka dugnadka (waalidiinta oo dhami waa in ay yimaadaan galabtii oo ay dibedda iyo gudahaba hagaajiyaan).
- Shirka waalid – laba shir ayaa sannadkii dhacaaya oo aan kaga hadlayno ilamaha koritaankiisa iyo laqabsashadiisa ee barnehageha, waxa kale oo aan u furanahay wadahadal inatan ka baxsan haddii aad rabtaan. (soo kaxayso turjumaan)

Booska kabadhka:
Caruur oo dhami waxa ay leedahay kabadh rasmi ah oo lagu ridi karo dhar door ah sida: nigis, garan, strømpebukse(surwaalka hoosta laga xidho),sharabaad, surwaal iyo funaanad.

Xasuusin waxa ay caruurta/waalidka cusubi ay tahay in ay barnehagenka u soo qaadaan:

- Kabaha guriga lagu joogo ama dacas.
- Koodhka roobka, surwaalka roobka iyo støvler(kabaha roobka) – cimilo kasta waan baxnaa.
  Nigsi, garan, strømpebukse(surwaalka hoosta laga xidho),sharabaad, surwaal iyo funaanad iyo kabo dheerad ah.
- Vinter(xiliga qabawga): faragashi, sharabaado adag, dhogor/ama funaanado suuf ah iyo surwaal , kabaha qaboobaha oo adag dress(isku joog).
- Sommer(Xiliga kulayka): kiriimka cadceeda, koofyad, dhar dabaaleed, tuwaal weynsurwaal gaaban, dirac, haaf iyo sandalo.
- Xafaayado ciddii isticmaasha.

Barashad iyo ka adkaanta:
Barnehagooyinka badabkoodu waxa ay leeyihiin firfircooni wiigiiba mar ah oo loogu talo galay caruurta dugsiga bilawday. Taa macnaheedu ma aha in aan anagu baranayno qorralka iyo akhriska. Koox-koox bay u fadhiisanayaan, halkaas oo lagu siinaayo firfircooniyaal iyo casharo. Sida. Barashada waxa isku wasan u dhaca (hus-mus), telle, spille spill iwm.

Waxa aan raacaynaa manhajka, waana waajib na dul saaran in aan 7 maado ee manhajka ku qoranba aanu dulmarno, tan waxa lagu qeexay qorshaha sannadka. Xaqqa ay caruurtu u leeyihiin saamaynta: in caruurta qorshaynta laga qayb geliyo iyo fulinta firfircooniyeyaasha iyo casharada, iyada oo la dhaysanaayo aaraadooda iyo fikradahooda.

Xadjeexidda – waxa lala samaynayaa iyada oo waalidka la kaashanaayo, waxaanaan ku mashquulsannahay in la maqlo oo la dhagaysto ilmo kasta. Waan la hadalnaa, u sharaxnaa oo wado tusinaa caruurta. Si aqoonsi leh ayaan caruurta ula kulanaa. Haddii aan aragno in ilmo, ilmo kale uu dhib ku qabo, waxa aan ku caawinaa/wado tusinaa sida ay dhibaatada u xalin lahaayeen.

Aqoonta bulshanimo: waxa aan ka shaqaynaynaa sidii ay caruurto si wanaagsan isugu arki lahaayeen. Caruurta waxa aan ku taageernaa oo ku wado tusinaa sidii ay xidhiidhka iyo la ciyaaridda caruuraha kale. Waxa kale oo aan waalidka siin karnaa wado tusin, haddii loo baahanyahay.

Gedoonka maalinta.
Caruurtu waxa ay barnehagenka yimaadaan inta u dhaxaysa 06.45 iyo 09.30.

Barnehagooyinka qaar ka mid ahi waxa ay qaybiyaan quraac ilaa 08.00. Qaar kalena waa in ay caruurtu soo qaadato quraac oo ay ku cunto barnehageda 09.00 wixii ka horeeya. Waxa fiican in ay quraacdu ahaato roodhi qamadi leh – iyo masalaan

khudrad. Cabitaanka barnehageda ayaa laga siinayaa. Macaanka sida sjokoladeda, potetgull(jibis) iyo nac-nac barnehageda dhexdeeda lama ogola.
Inta u dhaxaysa 06.45 – 09.30 caruurtu waxa ay kuu ciyaarayaan waxa ay jecelyihiin.

Caruurta waa in ay barnehageda gudaheda soo galaan 09.30, markaa waxa bilaabmaaya firfircoonidii loogu talo galay.
Firfircoonidaasu waa: ciyaar dibaded, socdaal, dubid, mashruuc ka shaqeyn, kooxo kala firfircooni duwan (sida tareenka, jimicsiga, lego)

Qaybta yaryarka waxa aan bilawnaa in aan xafaayadda bdelno qiyaastii 10.30, kuwa xafaayadda laga daayeyna geyna masqusha. Caruurta way faraxashaan miiskana way fadhiistaan.
Qaybta waaweynka waxa la isu yimaadaa qiyaastii 11.00 waxana lagu dhameeyaa masqul gelid, xafaayad-bedelid, bleieskift iyo maydhidda gacmaha.

Cuntada iyo wakhtiga cuntada: Saacad 11.00– 11.30 caaruurta ayaan nase-saace u samaynaa. Barnehagen waa uu ogsoonyahay in uu hayo cunto wanaagsan oo kala duwan. Kula duwanaansho barnehageyinka qaar waad ku arkaysaan, laakiin had iyo jeer waxa ka kooban tahay roodho/knekkebrød(roodhi buskud), ismaris iyo khudrad. Qaarna waxa ay sameeyaan wiigaba mar. Sharaab ayaa lala cabaa cuntada, caano ama biyo. Waa in aad barnehageda wargelisaan waxyaabaha uu ilmihiinu cuni karo. Barnehagooyinka qaar ka mid ah waxa ay caruurta baahida gaarka ah qabta ama xasaasiyadda u soo ibiiyaan cunto gaar aah , iyada oo ay cuntada xalaasha ahina ku jirto.

Nasesaacaha kadib waxa la saaxiyaa caruurta u baahan hurdada. Badankoodu waxa ay ku seexdaan vognaha, qaar ka mdi ahina waxa ay seexdaan gudaha kuwanna waxa aan u diyaarinay sariir/furaash. Vogn iyo bustebihiisa/bacdiisa waa in xaafadda laga soo qaado. Kuwa isticmaala kadaabad/ciyaaraha når marka ay seexanayaan waa in xaafadda looga soo qaado. Dhererka mudada hurdada waa in waalidka lagala balamo. Qaybta caruurta yaryar firfircooniyeyaal ayaa loogu sameeyaa dibedda ama gudaha caruurta aan seexan. Caruurta qaybta waaweyni waa in dibedda ku ciyaaraan.

Qaybta caruurta yaryar: 13.30 xafaayad cusub loo xidhaa, gacmahana laga maydhaa.

Khudrad cuniddu waa 14.00 - 14.30, waxa ay noqon kartaa khudrad la jarjaray, yoghurt iyo/ama roodhi buskud. Meelha qaar waa in ay caruurtu soo qaadato cunto duubanyoghurt, tan barnehage ilaa barnehage way ku kal duwan yihiin.

Saacadaha ugu dambeeya caruurtu waxa ay ku ciyaaraan dibedda ama gudaha, iyada oo ay hawada ku xidhan tahay.

Barnehageda waxa la xidhaa 17.00 – markaa waa in cid walba la soo kaxeeyo, haddii kale ganaac baa qofka loo jari karaa iyada oo la raacaayo sharciyada yaala.